# MACLIIMAAD LOOGU TALO GALAY QOFKA LA SIIYEY RIJEETO AY KU QORANYIHIIN DAAWOOYIN XANUUN BAABI'IYE AH

☐ **kiniika Paracetamol** (Alvedon, Panodil, Pamol, Reliv)

Kuwani waa daawooyin xanuun baabi'iyaal ah oo sida caadiga ah laga iibsan karo farmashiyaha iyada oo aan loo baahneyn wax rijeeto ah, waxaa ay leeyihiin ama maba laha wax dhibaatooyin ah, qiyaasta in la qaato lagu taliyaa waa.

Ugu badnaan 4 g/maalitii
Qiyaas 1 g (lab xabo oo kiniin ah) 6-dii saacadoodba mar

☐ **Kiniin Diklofenac**

Waa kiniin xanuun baabi'iye ah oo si fiican wax u tara, waxaana ay faa'iidadiisu sii koradhaa marka lala qaato paracetemol. Waxaa uu mararka qaarkood keeni karaa dhibaato xagga cloosha ah iyo halista ah in si fududloo dhiig baaxo oo korodha. Ma haboona in uu qataan dadka la il dara shaqada wadnha oo hooseysa (hjärtsvikt), shaqada kalyuhu ay hooseeyaan (njursvikt), uurka leh ama u nugul maadada magnasiilka.

Qiyaasta u badan: 150 mg/maalintiiba (50 mg 8-dii saacadoodba mar)

☐ **Kaabsal OxyNorm** Δ

Waxaa loo istmaalaa marka la daweynayo xanuunada aad u ba'an. OxyNorm waxaa loo isticmalayaa sidii dheeri oo kale, haddii kiniinada kale ee xanuun baabi'iyaasha ee lagu siiyey ay waxba kaa tari waayaan. Kaasasha waxaa loo liqayaa si duuduub ah. Dhibaatooyinkalagala kulmi karo waxaa ka mid ahaan kara yalaalugo iyo daal. Waxtarka ugu badan waxaa la gaadhayaa mudo hal saac gudaheed ah, waxaa uu isal markaa jidhka ku jirayaa qiyaastii 6 saacadood. OxyNorm waa in la iska ilaaliyaa in la isticmaalo marka uurka la leeyahay iyo marka la nuujinayo.
Qiyaasta: 1kaabsel 6-dii saacadoodba mar.

**Digniin xagga gaadiidka ah Δ**
OxyNorm waxaa ay hoos u dhigi kartaa awooda fal celinta. Waa in aad tani ka fikirtaa maadaama loo baahanay feejignaan joogto ah, tusaale ahaan marka baabuur la wado, haddii aad fulinryso hawlo u baahan hubaal qalad la'aan ah ama la isticmaalayo mishiino.

Qofka la qalo waxaa uu hubaashii dareema doonaa xanuun yar ama mid badan qaliinka ka dib. Waxaa aad qaadan doontaa rijeeto ay ku qoranyhiin daawooyin aad qaadan doonto maalmaha ugu horeeya. Si aad u hesho waxtarka ugu fiican waxaa aad raacaad sida dhakhtar kuugu qorey ee ku qoran qoraalkan hoos ku xusan. Haddii aanad dareemin wax xanuun ah uma baahnid in aad qaadato kiniinadaas.

**Macluumaad guud**
- Fadla ha isku darin kiniinda kale ee xanuun baabi'iyaasha adiga oo aan nala soo xidhiidhin.
- Fadlan xasuuso in kiniinada ku cabto biyo.
- Fadlan ka fikir in aanad OxyNorm ku daria aalkolo.
- Daawooyinka laga tagat waa in aad geysaa farmashiya kuugu dhow

Qaybta cudurada haweenka ee isbitaalka Skaraborg